

WARGEYSKA  
**FSAN**



**FSAN** | Federatie Somalische  
Associaties Nederland

**BRAINGAIN**  
SOMALIA

bringing minds  
together for  
Somalia



Tifaftire | Soo-Saare | M.Abdi Farah

Warside saddex bile ah oo ka soo baxa Netherlands, una adeega jaaliyadda Soomaalida, soona bandhiga warbixino

# TUSMADA WARGEYSKA



## Mashruuca Brain Gain Dib u dhiska Somalia

**Ma tahay aqoonyahan  
jaamacadeed?**

WAX-QABADKA FSAN IYO SADDEXDII BILOOD EE LA SOO DHAAFAY

Saameynta  
xagjirnimada  
dhalinta &  
Somalida  
Holland



**DOORKA  
FSAN EE KA  
HORTAGA  
GUDNIINKA  
HABLAHA**

Gabadh Soomaali Dutch oo loo xiray tuhun argagaxisinimo

# Mashruuca Brian Gain oo lagu soo bandhigay Netherlands si looga qeyb qaato dib u dhiska Somalia



**Waa markii ugu horeysay oo mashruuca Brain Gain loo bandhigay qurbo-joogta Soomaalida ee dalka Netherlands**

**D**allada guud ee ay ku mideysam yihiin badi ururada Soomaalida ee ka dhisan dalka Netherlands ee FSAN ayaa dhowaan shaaca ka qaaday is-diiwangelinta mashruuc loogu magacdaray 'Brian Gain' kaasoo qeyb ka ah dadaalada dib u dhiska dalka Somalia.

Barnaamij oo ah mid tijaabo ah ayaa fursad u siinaya qurbo-joogta Soomaalida Holland ee haysta shahaadooyinka tacliinta heer jaamacadeed ah ee doonaya in aqoon-tooda ay ugu deeqaan dalkooda

Soomaaliya.

Mashruucan ayaa bishii hore ee September lagu soo bandhigay shir lagu qabtay Hotel Bablyon ee magaalada Den Haag ee dalkan.

Codsadayaasha ku guuleysta baraamijkan ayaa qorsha uu yahay inay ugu badnaan muddo lix bilood ah ka soo shaqeeyaan magaalooyinka ay ka socdaan mashaariicda horumarineed gaar ahaan caasimada Somalia ee Muqdishu.

Bandhiga mashruucan waxaa ka soo qeyb galay aqoonyahano iyo arday Soomaaliyeed oo ka qalin jabiyey jaamacadaha dalkan Netherlands iyo waliba saarkiil ka socotay wasaarada arrimaha dibadda

Nederland oo iyadu maalingeli-naysa barnaamijkan.

Aggaasimaha mashruucan Brain Gain Fatima Hassan ayaa sharaaxaad ka bixisay sharuudaha laga doonayo qofka Soomaaliga ee doonaya inuu ka qeyb qaato barnaamijkan oo uu shaqo ka soo qabto Somalia.

Intii uu socday bandhiga mashruucan ayaa ka soo qeyb galayaasha waxaa fursad loo siiyey in su'aalo ka weydiiyaan guddiga howshan wada.

Cidii daneenaysa inay ka qeyb gasho baraamijkan waxay si toos ah u buuxin kartaa foomka link-gan <http://www.fsan.nl/index.php?p=61>

## WAX-QABADKA FSAN IYO SADDEXDII BILOOD EE LA SOO DHAAFAY

### Shir ku saabsanaa ka hortagga xagjirnimada dhalinyarada oo lagu qabtay Norway



Shir loogu hadlayey arrimaha xagjirnimada dhalinyarada Soomaalida iyo sidii looga hortaggi lahaa ayaa 9kii bishii September 2015 lagu qabtay magaalada Oslo ee caasimadda Norway.

Shirkan oo ay ka soo qeyb galeen qaar ka mida hay' adaha dowlada Norway iyo ururrada Soomaalida ee ka dhisan dalkaasi .

shirkaasi waxaa soo abaaulay urur Soomaaliyeed oo lagu magacaabo info123. .

Sahro Naleyee oo ah madaxa mashariicda horumarinta ee dalada FSAN, kuna hadlaysay magaca FSAN ayaa ka qeyb gashay shirkaasi.

Sahra waxay ka hadashay door-ka ay haweenka guud ahaan gaar ahaan kuwa Soomaalida ka qaadan karaan ka hortagida xagjirnimada dhalinta.

Sahra waxa ay si gaar ah uga hadashay xagjirnimada waxa ay tahay iyo waxyaabaha lagu garto iyo talaabooyinka looga hortago in dhalinta la duufsado. Waxay kaloo ka hadashay wax-qabadka dawladda Nederland ee arrimaha xagjirnimadda.

Shirkaasi ayaa waxaa si weyn looga dooday kaalinta social Mediayaha uu ku leeyahay in dhalinyarada maskaxda laga xado oo ay ku biiraan ururada argagixisida.

### TABABAR: Sare u qaadida xaqa ay leeyihiin carruurta



Tababar ku saabsanaa sidii sare loogu qaadi lahaa xaquuqda iyo awoodsiinta carruurta wiilasha

iyo gabdhaha da' doodu ay u dhaxayso 10 ilaa 16 jir ayaa 27kii September iyo 4tii Oktober lagu qabtay magaalada Amsterdam ee caasimada Netherlands.

Tababarkan oo ay ka qeyb qaatayn macallimiinta dugsiyada quraanka, dadka caruurta guryaha kaga caawiya casharada iskuulka iyo cashar bixiyayaal kale.

Intii lagu guda jiray maalmahii tababarkan ayaa xubnahii ka muuqday halkaasi waxay si weyn uga doodeen xaquuqda carruurta iyagoo halkaasi ku qaatay casharo ka caawin doona sida loo xaqiijiyo waxyaabaha ay caruurta ay xaqa u leeyihiin.

Ururrada tabarkaasi ka qaybgalay waxaa ka mid ah ururadda Soon ee Tilburg, Alphen aan den Rijn iyo ururka Wadata ee west Africa. Mashruucan waxaa maarayntiisa leh FSAN waxaana ka caawinay Kinderpostzegels .

# Gabadh Soomaaliyeed oo loo xiray tuhun argagixisinimo

**Rahme E. Waxay la nooleyd hooyadeed iyo walaalkeed oo muddo deganaa magaalada Sittard.**

**G**abadh da' deeda lagu sheegay 15 jir ayaa bishii hore ee September 2015 waxay booliska Dutch-ka ku xireen magaalada Sittard ee gobolka Limburg ee dalkan Netherlands, ka dib markii looga shakiyey inay ku lug leedahay arrimo argagixisinimo, sida uu 16-kii September daabacay wargeyska Telegraaf.

Gabadhahan oo magaceeda lagu sheegay Rahma E. ayaa la sheegay inay asal ahaan ka soo jeedo Somalia, waxayna booliska sheegeen dabagal dheer oo ay sameeyeen ka dib ay ku tuhmeen gabadhaasi inay doonaysay inay sameyso fal argagixiso, ayna xiriir la leedahay ururo xagjiriin ah.

Kiiska Rahma ayaa la sheegay in maxkamada ay dhageysatay ilaa 3 jeer.



Foto: Tinou Bao (bron: Flickr)

Björn Brinkman, oo ah qaarenka Rahma E., ayaa cadeeyey in gabadhan la xiray 3-dii September, laakiin aanu wax intaa ka badan uusan ka faalloon karin dacwacada loo haysto. Baariska kiiskan ayaa weli socota.

Sida ay qortay jariiradan Telegraaf, warar laga helay baaris la sameeyey Rahma E. waxay saaxiib dhow la aheyd gabadha

ka soo jeeda magaalada Sittard oo magaceeda la yiraahdo Aicha, taasoo ah 19 jir magacadeeda saxda uu yahay Sterlina P., waxaana la xiray bishii November ee sanadkii hore, ka dib markii la ogaaday inay ka soo laabatay dagaalka Syrië.

# Booliska Dutch-ka iyo Jaaliyadda Somalida oo ka arrinsaday saameynta xagjirnimada ay ku yeelan karto dhalinta



W. Qoray  
A. GUURE

**W**ejigii 3aad Kulanka ay ka soo qeyb galeen laamaha amniga ee dalkan Netherlands iyo Jaaliyadda Soomaalida degan dalkan, ayaa bishii hore ee September 2015 lagu qabtay Xarunta SOMVOA ee Magaalada Amsterdam.

Waxaa shirkaasi oo goob joog ay ka ahaayeen saraakiil booliis Dutch-ka oo ka kala socday magaaladaha Rotterdam looga hadlayey habka ay u wada-shaqeyn karaan Soomaalida iyo laamaha ammaanka iyo saameynta ay ku yeelan karaan caruurta & dhalinyarada Soomaalida arrimaha la xiriira xagjirnimada.

Kulankan waxaa soo qabanqaabiyey ururka Somali4all, waxaanna dadkii ka soo qeybgalay oo u badnaa ururada hoostaga dallada FSAN ay fikradahooda ka dhiibteen halista ka dhalan karta haddii dhalinyarada Soomaalida ay galaan dabinka argagixisada.

“Waa in la is-weydiinayaa sida ay ku dhacday in 26-kii qarax ee u dambeeyey ee Soomaaliya ka dhacay 19 ka mid ah dadkii fuliyey inay ahaayeen qurba joog Yurub ka tegay?” ayuu yiri Guddoomiye ku



xigeenka FSAN Max'ed Cusmaan (Guurre), waxa uuna intaasi ku daray in loo baahan yahay in qoysaska Soomaalidu ay iska war-qabaan, isla markaana ay xiriir wada-shaqeyn la yeeshaan dallada FSAN & ururada ku bahoobay.

Guurre waxa kale oo uu sheegay inuu u soo jeedinayo walaalidiinta Soomaaliyeed in ay adkeeyaan xiriirka ay la leeyihiin caruurtooda, ayna ka war-qabaan tillaabo kasta oo ay qaadayaan.

“Waalidiintu uma war hayaan arrimaha dhacaya waana qeyb dhibaata ka mid ah; xiriirka waalidiinta & caruurta waa inuu ahaadaa tiir adag laga soo billaabo barbaarinta caruurta ilaa iskuulka; sidoo kalena waalidiinta waxaan u soo jeedinayaa

inay ka qeybgalaan kulamada iskuulka sida “Report avond & 10 minuten gesprek” si ay waalidiintu ula socdaan heerka waxbarashada caruurtooda” Ayuu yiri Guurre, wuxuuna intaasi raaciyey in dhibaata caruurta Soomaalida u gaarka ah in ay tahay inay gaarin Jaamacad.

“Waxaa dhici kara in caruurta niyad jabaan marka la yiraa Jaamacad ma aadi kartid, cunugii waxaa laga yaabaa inuu isku arko inuu yahay “Failure” waxaa dhici kareysa in halkaas ay shidadu ka billaabato oo sida uu Internet-ka u hoos fadhiyo “Brain wash” lagu sameeyo” ayuu yiri Guurre, wuxuuna intaasi raaciyey in FSAN & ururada ku bahoobay ay diyaar u yihiin in ay ka caawiyaan

Soomaalida wacyigelinta & la socodka xaaladooda.

Cabaas Nuur Cali oo kulanka shir-guddoominayey wuxuu dhinaciisa kulanka ka soo jeediyey warbixin uu ku sharaxayo waxyaabaha keena xagjirnimada & sida lagaga hortegi karayo; isaga oo xusay sida ay muhiim u tahay wada-shaqeyn dhexmarta booliska & Jaaliyadaha Soomaalida. Waxaan soo jeedinayaa in booliska Holland lagu daro dhalinyaro Soomaali ah si mushtamaca Soomaalida ah dhiiragelin ugu noqoto arrintaasi, maadaama ilaa weli aan aan lagu arkin dad Soomaali ah oo booliska ka tirsan” Ayuu yiri Cabaas Nuur Cali oo ah aqoonyahan ka tirsan Jaaliyada Soomaaliyeed ee Zwolle.

# DOORKA FSAN EE KA HORTAGA GUDNIINKA HABLAHA

**E**rayga VGV ee ka hortaga gudniinka hablaha waxa uu ilaa bilowgiisa uu soo baxay uu ahmiyad gaar ah u lahaa daladda guud ee FSAN iyadoo arrinta la dagaalanka caadadan ay kala kaashanaysay dad aqoon u leh.

FSAN waxay bartamahii 90 meeyadii laga soo bilaabo ay aheyd hormuudka mashruuca la dagaalanka gudniinka haweenka noocuu doono ha ahaadee, iyadoo dalka Netherlands ka bilowday mashruucan.

Dowlada Netherlands waxay mar walba ay mashruucan kala tashataa FSAN qaabka ugu haboon ee Soomaalida loogala dagaalami karo inay joojiyaan ku dhaqanka caadada gudniinka.

Bilowgii mashruuca ka hortaga gudniinka oo si rasmiya u bilowday 2006-kii ayaa FSAN waxay ka ciyaartay door muhiim ah iyadoo qabatay tababaro wacyi gelin ah oo bulshad Somalida iyo wadamada kale ee Afrikaan ah looga digayo halista gudniinka hablaha.

Waxaa si gaar ah loo tababaray shaqsiyaad ka soo jeeda wadamada laga isticmaali gudniinka, kuwaasoo cashar-bixiyayaal u noqonaya dadka ay ka soo jeedaan. Tababarada waxaa FSAN la



qabanayey hay' ada Pharos. Cashar-bixiyayaasha waxaa kaloo la siiyey tababar la xiriira sida ay u caawin lahaayeen haweenka la guday ee loo sameeyey daaweynta.

FSAN waxay ka qeyb qaaday tababato kala duwan oo la xiriira la dagaalanka gudniinka heer caalami iyo heer wadanba. FSAN waxay wada-shaqeyn buuxda arrintan ay kala sameysaysaa ururo

caalami ah sida:

Ururka Nederland u qaabil-san dhinaca faya-dhowrka ee GGD.

Pharos oo ah urur ka shaqeeya caafimaadka soogalootiga iyo qaxootiga.

Ururo Afrikaan ah. Cashar bixiyaasha ka hortaga gudniinka.



# BRAINGAIN

## SOMALIA

bringing minds  
together for  
Somalia

Brain Gain Somalia is een project van FSAN

